METRO NASHVILLE PUBLIC SCHOOLS

# IKHTIYAARIGA AH DUGSIYADA

**2024-2025 CODSIGA**

CODSO UGU DAMABEYN FEBRAAYO 9!



# Helitaanka Dugsiga Ku Habboon

Ardaydeena ugu da'da yar ilaa kuwa qalinjebinta soo socota, waxaa jira sidaa waayo aragnimo badan oo aad kala kulmi karo Dugsiyada Dadweynaha Metro Nashville. Waxaa ina haga hadaf fudud: inaan gaarsiino waxbarasho dadweyne oo weyn arday kasta, maalin kasta.

Shaqaalaha iyo barayaasha Dugsiyada Dadweynaha Metro Nashville waxay kugu soo dhoweynayaan MNPS! Degmadeenu waxay bixisaa 160 dugsi oo leh barnaamijyo iyo fursado kala duwan si ay u daboolaan baahiyaha qoyskaada. Waxaa ka sii muhiimsan, waxaan diirada saarney inaan ardaydeedna siino waxbarashada gaarka ah adeegyada iyo xiriiryada ay u baahan yihiin si ay u guulaystaan. Hadafkeenu waa inan hubinno in laga yaqaan dugsiyadeena oo ay yaqaanaan - macallimiintooda iyo hogaankooda- iyo inay kala kulmaan dareen guud oo ah ka mid ahaanshiyaha bulshada dugsigooda.

Sannad kasta, Codsiga Dugsiyada Ikhtiyaariga ah wuxuu u ogolaanayaa qoysaska inay codsadaan dugsiyo ikhtiyaari ah, marka lagu daro dugsiga aaggooda. Baro wax badan oo ku saabsan dugsi aaggaaga ah ama dugsi ikhtiyaari ah maanta - waxaan sugi la'nahay inaan ku tusno MNPS.

**BARO WAX DHEERAAD AH**
oo ku saabsan nidaamka dusgiyada ikhtiyaariga ah ***mnps.org/school-options***.

**AQOONSO DUGSIGA AAGAAGA**
adigoo isticmaalaya Zone Finder-ka
***mnps.org/register-for-school***
ama ka wac Xarunta Macluumaadka Qoyska 615-259-INFO(4636).

Qaababka loo heli karo macaluumaadka buug yaranhan waxaa laga heli karaa ***mnps.org/school-options***.

## 3 Talaabo oo kaa caawinaya inaad u heshid dugsiga ku habboon ubadkaaga

### 1. SAHMI IKHTIYAARADAADA

Cooqo ***www.mnps.org/school-options*** si aad u sahamiso dugsiga ikhtiyaaradaada. Soo hel aaggaaga dugsi adigoo isticmaalaya Zone Finder oo baro macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxyaabaha uu bixiyo dugsi kasta booqo website-ka dugsiga ama adiga oo wacaya Xarunta Macluumaadka Qoyska 615-259-INFO(4636).

### 2. BOOQO DUGSIYADA

Dugsiyadu waxaa laga yaabaa inay martigeliyaan si shakhsi ama dhacdo virtual ah, sida booqshooyin iyo fadhiyo macaluumaad oo online ah. Ka eeg website-ka ama shabakada baraha bulshada ee dugsiyada aad xiiseynayso si aad u aragto sida ay u qorsheynayaan inay u soo bandhigaan dugsigooda oo u oggolaadaan inay qoysasku ku xirmaan shaqaalaha.

### 3. CODSO FEBRAARYO 9

Haddii aad rabto inaad codsato dugsi ikhtiyaari ah, ka codso online-ka www.mnps.org/school-options ama isticmaal arjiga warqadda ah ee ku yaal dhabarka buug-yarahaan. Habka xulashada random-ka ah ee bisha Maarso ayaa go'aamin doona gelitaanka dugsiga iyo liiska sugitaanka. Codsiyada soo daaha waxaa lagu dari doonaa liiska sugitaanka haddii dugsigu buuxo ama laga aqbali doona dugsiyada leh kuraas furan. Qoysaska ku cusub MNPS waxaa laga yaabaa sannadka oo dhan dalbadaan dugsiyada ikhtiyaariga ah ee kuraastooda banaan tahay. Qoysaska doonaya inay doortaan dugsi charter ah waxay sidoo kale codsan karaan sannadka oo dhan.

# Sida Nidaamka Dugsiyada Ikhtiyaariga ahi u Shaqeeyo

## Ka hor Intaanad Codsan

### WAXAAD U BAAHAN TAHAY SI AAD U CODSATO

» Waalidka/mas'uul waa inuu deggan yahay Davidson County ka hor inta uusan ilmihiisa u soo gudbin Codsiga Dugsiyada Ikhtiyaariga ah.

» Lambarka aqoonsiga ardayga oo ay bixisay MNPS ayaa loo baahan yahay. Qoysasku waxay lambarka aqoonsiga ardayga ID ka dalban karaan internetka ***www.mnps.org/register-for-school***. Lambarka aqoonsiga ardayga ID waxaa sidoo kale laga yaabaa in laga helo mid ka mid ah siddeeda xarumood ee diiwaangelinta degmada.

» Waalidka/mas'uulka waa inuu lahaadaa ciwaan emayl oo sax ah ama telefoon lambar si uu codsi u soo gudbiyo.

### SAHAMI DUGSI IKHTIYAARI AH

In si buuxda laysu barbardhigo doorashada dugsiga oo algu sameeyo xulasho xog ogaal ah oo ku saabsan Codsiga Dugsiga Ikhtiyaariga ah, qoysaska waxaa si xoog leh loogu dhiirigelinayaa inay la shaqeeyaan dugsiga ay xiisanayaan, oo uu ku jiro dugsigooda aagga ah. Booqo website-ka dugsiga iyo bogagga baraha bulshada ama wac xafiiska hore si aad wax uga ogaato dhacdooyinka virtualka ah - tallaabo muhiim ah oo lagu hubinayo cimilada, dhaqanka iyo waxbarshada dugsigu bixiyo ay buuxinyaan baahiyaha ubadkaaga.

Liiska dugsiyada ikhtiyaariga ah ee leh kuraas diiwaangelineed oo furan ayaa laga heli karaa bogagga 13 iyo 14 ee buug-yarahaan.

### GAADIIDKA

Inta badan, gaadiidka baska dugsiga lama siiyo ardayda aagga ka baxsan ee taga dugsiyada ikhtiyaariga ah. Fiiri liiska su'aalha inta badan la is weydiiyo ee bogga 5aad si aad u hesho tafaasiil dheeraad ah ama ka hubi dugsiyo gaar ah sida loo go'aamiyo helitaanka gaadiidka.

Gaadiidka daweynaha ee mara WeGo Public Transit-ka ayaa kharash la'aan lagu siiyaa dhammaan ardayda dugsiga sare iyada oo loo marayo barnaamijka StrIDe, halkaas oo kaararka aqoonsiga ardayga loo adeegsado bas raacida. Isla barnaamijkaas ayaa u diyaar ah ardayda dugsiga dhexe ee dhigata dugsiga ikhtiyaariga ah, marka laga reebo ardayda dhigata dugsiga dhexe ee charter-ka. Ogolaanshaha waalidka ee ardayda dugsiga dhexe ayaa loo baahan yahay si ay u helaan kaarka baska ee StrDe. Wax badan ka baro ***www.mnps.org/transportation***.

### XAADIRITAANKA

Ogolaanshaha iska diiwaangelinta dugsi ka baxsan aagga waxaa lagu bixiyaa fahamka ah in imaanshaha ardaygaagu u hoggaansami doono siyaasadda xaadiritaanka degmada. Ku guuldareysiga in loo hoggaansamo siyaasadda imaanshaha waxay keeni kartaa in lagala noqdo ku meeleynta dugsi ka baxsan aagga.

### SHURUUDAHA OGOLAANSHAHA GAARKA AH

Dugsiyada soo socdaa waxay shuruudo gelitaan oo waxbarsaho: Hume-Fogg High School, Martin Luther King Jr. School, Meigs Middle School and Early College High School. Eeg bogogga 9 iyo 10 si aad u hesho faafhfaahin dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha waxbarasho ee dugsiyadan.

Dugsiyada soo socda waxay u baahan yihiin inay ardaydaan sameeyaan bandhig iyo/ama wareysi ay la yeeshaan: Isaiah T. Creswell Middle School of the Arts, Nashville School of the Arts and Nashville Big Picture High School. Dugsiyadu waxay la xiriiri doonaan codsadayaasha si ay u diyaariyaan bandhigyo ama wareysiyo.

Dugsiga Vurtualka MNPS sidoo kale wuxuu leeyahay shuruudaha gelitaanka. Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan kala xiriir dugsiga.

## Buuxinta Codisga

» Codsiga ku codso ilaa toddoba dugsi.

» Doorashooyinka dugsiga waa in loo kala horumariyaa kow (mudnaanta ugu sarreysa) ilaa toddoba (mudnaanta ugu hooseysa)—tan waxaa ku jira dugsiyada dariiqa iyo dhammaan dugsiyada u baahan wareysi ama bandhig.

- Codsiyada oo dhan waxaa la geliyay hab random kombuyuutar ah oo lagu soo xulayo.
- Haddii ilmahaaga loo xusho inuu dhigto mid ka mid ah dugsiyada codsigaaga inta lagu jiro nidaamka xulashada randomka, waxaa lagu siin doonaa fursad aad ku aqbasho kursiga dugsigaas. Kursiga waa in lagu aqbalaa ama lagu diidaa waqtiga kama dambeysta ah.
- Imahaaga waxaa lagu dari doonaa liiska sugitaanka dugsi kasta oo liiskaaga mudnaanta leh ka sareeya marka loo eego dugsiga ilmahaaga loo xushay inuu dhigto.
- Ilmahaaga waxaa "waxaa laga saari doona" dugsi kasta — oo ay ku jiraan dugsiyada dariiqa — kuwaas oo loo taxaabey inay yihiin kuwa ka mudnaan hooseeya marka loo eego dugsiga ilmahaaga loo doortey inuu dhigto.
- Qoysaska liiska ku qora dhowr xulasho ama kaliya dugsiyada aad loo dalbado ayaa laga yaabaa inaan loo xulan mid ka mid ah dugsiyada ku jira codsigooda.

- Marku qoysku doorto inuusan kursi ku aqbalin taariikhda kama dambeysta ah, booskaas kursigaas ayaa la siinayaa qoysaska ku jira liiska sugitaanka sida ay u kala horreyaan.
- Qoysaska waa laga "soo saari doonaa" waxaana la siin doonaa kursi diyaar ah waqti kasta laga bilaabo Ma 22, 2024, ilaa maalinta shanaad ee dugsiga ee sannad dusgiyeedka 2024-2025 marka boosas la helo.
- Qoysaska waxaa lagu ogeysiin doonaa xulashooyinkooda SMS, emaylka iyo/ama boostada.

## Soo Gudbinta Codsiga

» **Qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay internetka ka codsadaan *www.mnps.org/school-options*.** Dhammaan isbeddellada codsiga jira waa in lagu sameeyaa internetka. Haddii aad u baahan tahay internet, waxaad booqan kartaa laanta kuugu dhow ee Maktabadda Dadweynaha ee Nashville.

» Codsiyada warqadda ah (ee ku yaal dhabarka buug-yarahaan) waa la qabalayaa waana in lagu soo celiyaa Xafiiska Dugsiga ikhtiyaariga.

- Ku soo gudbi codsiga warqadda ah shakhsi ahaan ama boosta:
  Xafiiska Dugsiga Ikhtiyaariga ah ee
  Dugsiyada Dadweynaha ee Nashville
  2601 Bransford Ave.
  Nashville, TN 37204

» Codsiyada waraaqaha ah ee la helay Feb. 9, 2024, saacadu markey tahay 4:30 p.m. CST waxaa lagu dari doonaa habka xulashada randomka ah. . Codsiyada online-ka ah ayaa la aqbali doonaa ilaa 11:59 p.m. CST Feb. 9, 2024. Dhammaanka codsiyada la helo ka dib waqtiga kama dambeysta ah waxaa xagga dambe lagaga dari doonaa liiska sugitaanka.

» Ku sii socoshada dariiqa dammaanadda leh waa in lagu xaqiijiyo soo celinta warqadda dariiqa hore ee ilmahaaga ama ku soo gudbinta codsiga online-ka. Faahfaahinta dheeraadka ah ka eeg su'aalaha inta badan la isweydiiyo bogga 6.

**SI AAD WAX BADAN UGA BARATO DUGSIYADEENA**
booqo ***schools.mnps.org***.

**AQOONSO DUGSIGA AAGAAGA**
adigoo isticmaalaya Zone Finder-ka ***mnps.org/register-for-school*** ama ka wac Xarunta Macluumaadka Qoyska 615-259-INFO(4636).

## KA CODSIGA ONLINEKA

***www.mnps.org/school-options***

*Scan-garee QR code-kan si aad u codsato*

## KA CODSIGA BOOSTADA

*Buuxi codsiga warqadda ah ee ku yaal dhabarka buug-yarahan oo u soo dir:*

**XAFIISKA DUGSIGA IKHTIYAARIGA AH**
DUGSIYADA DADWEYNAHA EE NASHVILLE
2601 BRANSFORD AVE., NASHVILLE, TN 37204

## SU'AALAHA?

*Wixii su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan doorashada dusiga ee Dugsiyada Metro:*

**KA WAC XARUNTA MACLUUMAADKA QOYSKA 615-259-INFO(4636)**
AMA **BOOQO WWW.MNPS.ORG**

# Codsiga Dugsiyada Ikhtiyaariga ah ee MNPS
# Kal tuska 2024-2025

**MONDAY, JAN. 22, 2024**

**Codsiyada La Heli karaa**

Codsiyada Dugsiyada Ikhtiyaariga ah waxaa laga heli karaa online-ka ***www.mnps.org/school-options*** ee fasalada K-12. Dhammaan dugsiyadu waxay codsi guriga ugu soo dhiibi doonaan ardayda. Tan waxaa ku jira "Foomamka sii haynta dariiqa" ee ardayda ka soo baxaysa dugsiga hoose ilaa dhexe ama dugsiga dhexe ilaa sare dariiqa la ansixiyay ayaa guriga loo diri doonaa. Tan waxa kale oo ku jira codsiyada fasallada 11aad iyo 12aad.

**JIMCE, FEB. 9, 2024 BY 4:30 P.M. CST***

**Codsiga iyo Waqtiga Kama Dambeysta ah ee Dariiqa**

Qoysasku waa inay foomamka ku soo celiyaan Xafiiska Dugsiga Ikhtiyaariga ah. Codsiyada la helo waqtiga kama dambeysta ah waxay ka mid noqon doonaan habka xulashada randomka ah ee maalinta la xulayo. Xilliga kama dambeysta ah waxaa sidoo kale ku jira dhammaan "foomamka sii haynta dariiqa" ee ardayda ka baxaya dugsiga hoose ilaa dhexe ama dugsiga sare ee ku socda dariiqa la ansixiyay. Codsiyada la helo Jimcaha ka dib, Febraayo 9, 2024, waxaa lagu dari doonaa dhammaadka liiska sugitaanka. ***Xilliga kama dambeysta ma khuseeyo codsadayaasha fasalada preschool, Pre-K, 11aad am 12aad.***

**ISNIIN, MAARSO 4, 2024**

**Maalinta Natiijooyinka Xulashada**

Natiijooyinka maalinta xulashada ee kindergarten ilaa fasalka 10aad waxaa laga heli karaa online-ka***www.mnps.org/school-options*** ama adigoo wacaya 615-259-INFO(4636). Ardayda gelaya preschool, Pre-K, 11aad iyo 12aad kuma jiraan

**ARBACO, MAARSO 6, 2024**

**Warqadaha Aqbalaada iyo Liiska Sugitaanka ayaa La Diray**

**JIMCE, MAARSO 8, 2024 4:30 P.M. CST***

**Fasalad 11aad iyo 12aad Waqtiga Kama Dambeysta ee Codsiga**

Codsiyada la helo waqtiyada kama dambeysta ah waxay ka mid noqon doonaan nidaamka xulashada randomka ee fasalada 11aad and 12aad. Codsiyada la helo wixii ka dambeeya Jimcaha, Maarso 8, 2024 waxaa la gelin doonaa dhammaadka liiska sugitaanka.

**JIMCE, MAARSO 22, 2024 4:30 P.M. CST***

**Waqtiga Kama Dambeysta ah ee Soo Celinta Waraaqaha Aqbalaada**

Warqadda aqbalaada waa in lagu soo celiyaa Xafiiska Dugsiyada Ikhtiyaariga ah taariikhdan ama ka hor. Waalidiinta waxay sidoo kale ku aqbali karaan online-ka ***www.mnps.org/school-options***.

**JIMCE, MAARSO 22, 2024**

**Maalinta Natiijada Xulashada Fasalada 11aad iyo 12aad**

Natiijooyinka fasalada 11aad iyo 12aad ayaa heli doonaa ***www.mnps.org/school-options*** ama kala xiriir Xarunta Macluumaadka Qoyska 615-259-INFO(4636)

**ISNIIN, ABRIL 8, 2024 4:30 p.m. ***

**Xilliga Kama Dabeysta ah ee Aqbalaada Booska Fasalka 11aad iyo 12aad**

**ARBACO, MAAJO 8, 2024**

**Warqadaha Xaqiijinta Meeleynta Ardayda Ayaa La Dirayaa**

**ARBACO, JUULAAY 24, 2024**

**Maalinta ugu Dambeysa ee Codsiga Dugsiyada Ikhtiyaariga ah ee leh Boosas Kooban**

**JIMCE, OGOS. 23, 2024**

**Maalinta ugu Dambeysa ee Ardayda hadda Dhigata ay Codsan karaan Dugsiyada leh Boosas La heli Karo**

Qoysaska cusub ee MNPS waxaa laga yaabaa in sannadkoo dhan dalbadaan dugsiyo ikhtiyaari ah oo boosas banaan haya. Qoysaska doonaya inay xushaan Dugsi Charter ah ee MNPS ayaa waxay sidoo kale codsan karaan sannadka oo dhan.

**** Ku soo gudbinta online-ka waxay xirmaysaa 11:59 p.m. CST***

# Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo

### YAA XAQ U LEH INUU CODSADO DUGSIYADA IKHTIYAARIGA AH?

Arday kasta oo waaldikii ama mas'uulka uu deggan yahay Davidson County watqiga codsiga wuu codsan karaa.

### ILMAHAYGU AM U BAAHAN YAHAY ID LAMBARKA ARDAYGA SI UU U CODSADO?

Haa. Ilmo kasta oo ka diiwaangashan MNPS waxaa looga baahan yahay inuu leeyahay lambarka aqoonsiga ardayga ee sagaalka-god ah kana bilaabma 190. Lambarka aqoonsiga ardayga ee ardayda hadda wax dhigta waxaa laga heli karaa kaarka warbixinta ilmaha ama waxaa laga codsan karaa dugsiga ilmaha. Lambarka aqoonsiga ee ardayga cusub waxaa laga heli karaa online-ka ***www.mnps.org/register-for-school*** ama mid ka mid ah siddeedda xarumood ee isdiiwaangelinta degmada adigoo soo bandhigaya shahaada dhalashada ilmaha oo ay la socoto caddaynta degenaanshaha waalidka/mas'uulka iyo koobiga batantaha darawalka.

### SIDEE AYAAN U CODSADAA?

**Qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay online ka codsadaan *www.mnps.org/school-options*.** Dhammaan qoysaska doonaya inay internetka ka codsadaan sameeyaan astaanta waalidka oo u baahan username iyo password. Username-ku waa inuu noqdaa telefoon number ama emayl sax ah. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo samaynta ciwaanka emaylka, fadlan kala xiriira Xarunta Macluumaadka Qoyska 615-259-INFO(4636). Helintaanka internet lacag la'aan ah ayaa laga heli karaa Maktabadda Dadweynaha ee Nashville ee kuugu dhow ama Xarunta Macluumaadka Qoyska ee MNPS, oo ku taal 2601 Bransford Ave., Nashville, TN 37204.

Codsiyada warqadaha ah ayaa lagu soo gudbin karaa boostada ama gacanta yaa lagu keeni karaa. Haddii aad boostada ku direyso ka soo qaado foomka “Return Receipt Requested” ee Adeegga Boostada Mareykinka. Waa mas'uuliyadda waalidiinta inay hubiyaan in Xafiiska Dugsiyada Ikhtiyaariga ah uu helo dugsiga. Haddii boostada lagu soo diro rasiid la'aan, degmadu ma xaqiijin karto helitaanka codsiga. **Lama aqbali doono codsiyada lagu soo diro fax-ka.**

### SIDEE AYUU U SHAQEEYAA NIDAAMKA XULASHADA?

Doorasho bakhtiyaa nasiib ah ayaa la qaban doonaa si loo buuxiyo boosaska banaan ee dugsiyada ku qoran codsigan (eeg bogagga 13-14. Kaliya cosiyada la soo gudbiyay lana dhammaystirey kama dabays Feb. 9, 2024, ayaa lagu dari doonaa habka xulashada randomka ah.

Natiijada habka xulashada randomka ah waxaa la heli doonaa maalinta xulashada, Maarso 4, 2024. Natiijooyinka Maalinta Xulashada ayaa lagu soo dhejin doonaa online-ka www.mnps.org sidoo kale waxaa lagu heli karaa adigoo la xiriira Xarunta Macluumaadka Qoyska 615-259-INFO(4636). Natiijooyinka Maalinta Xulashada ilmahaaga waxaa loo dirir doonaa Maarso 6, 2024, ciwaanka lagu sheegay codsiga.

Doorashada dugsiga waa in lagu kala horumariyaa arjiga laga bilaabo 1 (mudnaanta ugu sarreyasa) ilaa 7 (mudnaanta ugu hooseysa). Hadii ilmahaaga loo xusho boos dugsi, waxaa laguugu ogeysiin doonaa SMS, imaylka ama waxaad boostada ku heli doontaa warqad aqbalaad ah, taas oo ay tahay in lagu soo celiyo Maarso 22, 2024. Waxaad kale oo aad ku aqbali kartaa booska ilmahaaga online-ka oo aad heli kartaa xaqiijin.

Haddii ilmahaaga aan loo xulan dugsi gaar ah, waxaa lagu dari doonaa liiska sugitaanka sannad dugsiyeedka 2024-2025 ilaa dugsiga aanu ku jirin liista mudnaanta ka hooseeya dugsigii ilmahaaga laga siiyay booska. Ilmahaaga waxaa "laga saari doonaa" dugsi kasta, oo ay ku jiraan dugsiyo la damaanad qaado, kuwaas oo liiska kaga hoose lisska mudnaantaada marka loo eego dugsigii ilmahaaga loo xushay inuu dhigto. Nidaamkan waxaa loo dejiyay si uu qoysasku u siiyo ikhtiyaarka ah inay dhigtaan dugsigooda ugu darajada sareeya halkaas oo boos laga heli karo. Fadlan ogoow in dhammaan liiska sugitaanka ee dugsiyada aan ka ahayn ee fasalada K-12 lagu kala diri karo shanta maalmood ee ugu horreeya ee imaanshaha dugsiga.

Marka ardaygu aqbalo boos dugsi ikhtiyaari ah, magaciisa ayaa laga sarayaa dugsi kasta oo uu hadda dhigto ama hore looga aqbalay sannad dugsiyeedka 2024-2025. **Ardaydu waa inay dugsiga tagaan maalinta ugu horeysa ama waxaa loo aqoonsan doonaa “aan soo xaadirin" booskoodana waxaa buuxinaya arday kale oo ku jira liiska sugitaanka.**



Codsadayaasha fasalada 11aad iyo 12aad waxay maraan habka dib eegista koorisyada ay soo qaateen ee gelitaanka boosaska banaan. Dhammaan codsiyada la dhammaystirey ee leh dukumenti dib u eegis qoraal ah waa in la helaa Maarso 8, 2024, ama ka hor, si ay qeyb uga noqdaan habka xulashada randomka ah. Natiijooyinka xulashada randomka ah waxaa la heli doonaa Maarso 22, 2024.

Nidaam xulasho oo gaar ah ayaa loo qaban doonaa kuraasta Pre-K gu'ga 2024. Codsi gaar ah ayaa loo baahan yahay si loo codsado preschoolka iyo booska Pre-K ee dhammaan dugsiyada, oo ay ku jiraan Stanford Montessori and Hull-Jackson Montessori.

### MIYAAN U BAAHANAHAY INAAN DIB U CODSADO SANNAD KASTA SI AAN U DHIGTO DUGSIGA IKHTIYAARIGA AH?

Maya. Ardayda hadda jirta ee K-12 ma'aha inay dib u codsadaan si ay uga sii diiwaangashanaadaan dugsigooda ikhtiyaariga ah ee hadda. Bisha Maajo, ilmahaagu waxa uu dugsigiisa ka heli doonaa warqad caddaynaysa/sii wadashada si loo xaqiijiyo meeleynta kursigiisa ee sannad dugsiyeedka 2024-2025. No action is needed if your child is moving from one grade to the next in the same school. Ha buuxin codsi cusub. Ardayda hadda ku jirta Pre-K waa inay dib u codsadaan Kindergarten xitaa haddii lagu meeleeyay Waxbarashada Gaarka ah ama habka bakhtiyaanasiibka Pre-K. Ardayda dhigata Hull-Jackson Montessori iyo Stanford Montessori MA'AHA inay dib u codsadaan.

Ogolaanshaha iska diiwaangelinta dugsi ka baxsan aagga waxaa lagu bixiyaa fahamka ah in imaanshaha ardaygaagu u hoggaansami doono siyaasadda xaadiritaanka degmada. Ku guuldareysiga in loo hoggaansamo siyaasadda imaanshaha waxay keeni kartaa in lagala noqdo ku meeleynta dugsi ka baxsan aagga.

### ILMAHAYGU MA LEEYAHAY DARIIQ LA HUBO OO UU MARO DUGSIGA DHEXE/SARE HADDII UU DHIGTO IKHTIYAARI AH?

Dhammaan ardayda MNPS waxay haystaan dariiqa dammaanad-qaadka oo ay ku aadayaan dugsiga aaggooda. Ardayda dhigata dugsi ikhtiyaari ah oo ka baxsan aaggooda, waxaa waddooyin dheeraad ah oo dammaanad qaadaya (eeg liiska su'aasha soo socota ee hoose). Si kastaba ha ahaatee, caqabadaha awoodda awgood, degmadu ma dammaanad qaadi karto dariiqyada loo maro dhammaan dugsiyada dhexe iyo sare ee aaggaga ardayda ee aagga ka baxsan ee dhigta dugsiyadaas diiwaangelinta furan Haddii uu ilmahaagu ka maqan yahay aagga ee uu dhigto dugsi hoose ama dhexe oo ikhtiyaari ah oo aan ku jirin liiska waddo, markaas ilmahaagu wuxuu u baahan doonaa inuu codsado xilliga kama dambeysta ah ee dugsiga quudinta aagga waxaana la siin mudnaan ku salaysan sida booska loo heli karo. Tan waxaa loo qeexaa "doorbididda kutlada." Haddii dugsiga quudiyaha ah ee aagaaga ah aanu ku jirin liiska Codsiga Dugsiyada Ikhtiyaariga ah, tani waxay muujinaysaa in dugsigu aanu lahayn awood uu ku aqbalo ardayda ka baxsan aagga mana awoodeysid inaan sii wadato dugsigan.

### MIYAAN U BAAHANAY INAAN CODSADO HADDII UU ILMAHAYGA UU KU JIRO DUGSI IKHTIYAARI AH OO LEH WADDO DAMMAANAD QAAD LEH OO UU UGU GUDBO DUGSI KALE OO IKHTIYAARI AH?

Haa. Haddii kani uu yahay sannadkii ugu dambeeyay ee ilmahaagu dhigto dugsi halkan ku qoran oo aad rabto inay ku sii socdaan dariiqa dammanadda ah ee liiska ku jira, waa inaad foomka sii wadashada waddad, kaas oo guriga looga soo diri doono dugsiga ilmahaaga. Waxaad kale oo aad ku xaqiijin kartaa sii wadashada dariiqaaga adiga oo online-ka ka buuxinaya Codsiga Dugsiyada Ikhtiyaariga ah Foomka sii wadshada dariiqa ama codisga online-ka ah waa in la oo gudbiyaa Feb. 9, 2024.

**Dariiqyada Dusiga Hoose ilaa Dugsiga Dhexe**

- Carter-Lawrence Elementary students who want to go to Rose Park Middle
- Robert Churchwell Elementary students who want to go to John Early Middle
- Hattie Cotton Elementary students who want to go to Stratford STEM Magnet School (Lower Campus)
- Jones Elementary students who want to go to Haynes Middle
- Lockeland Elementary students who want to go to East Nashville Middle
- Sylvan Park Elementary students who want to go to Haynes Middle

**Dariiqyada Dugsiga Dhexe ilaa Dugsiga Sare**

- Isaiah T. Creswell Middle School of the Arts students who want to go to Nashville School of the Arts *(limited to 30 seats)*
- East Nashville Middle students who want to go to East Nashville High
- Haynes Middle students who want to go to East Nashville High
- Head Middle current sixth or eighth grade students who qualify to go to Martin Luther King Jr. School
- John Early Middle students who qualify to go to Hume-Fogg High
- LEAD Cameron students who want to go to LEAD Academy
- Liberty Collegiate students who want to go to RePublic High
- Meigs Middle students who qualify to go to Hume-Fogg High
- Nashville Prep students who want to go to RePublic High
- Rose Park Middle students who qualify to go to Martin Luther King Jr. School

Waxaa jiri doona dariiq xagaa oo la siinaayo ardayda dhigata dugsiyada dhexe ee Head, Rose Park, John Early ama Meigs kuwaas oo aan u qalmin deyrtii la soo dhaafey oo hadda u qalma inay dhigtaan Dugsiyada Sare Martin Luther King Jr. School and Hume-Fogg iyadoo lagu salaynaayo 2023-2024 TCAP ama Benchmarkiga Degmada ee gu'ga iyo GPA 80 ama ka sarreeya laga bilaabo, toddobaadka seddexaad iyo afraad ee sagaalka toddobaad ee labaad oo aan derajo dhicitaan ah lahayn Ogeysiiska dariiqa xagaaga wuxuu dhici doonaa Juulaay ama Ogosto ka dib marka la helo buundooyinka imtixaanada caadiga ah ee Gobolka Tennessee. Haddii aad filanayso foomka dariiqa bisha Juun oo aad fasax ku jirto

Juulaay ama Ogosto, fadlan emayl u dir ***schooloptions@mnps.org*** wixii macluumaad dheeraad ah.

### MA CODSAN KARAA WAX KA BADAN HAL DUGSIYADA IKHTIYAARIGA AH?

Haa, qoysaskana waxaa lagu dhiirigelinayaa inay saa yeelaan. Waxaad codsan kartaa ilaa iyo toddoba dugsi ikhtiyaari ah, oo loo kala horreysiinayo sida loo kala doorbidayo. Qoysaska soo taxa doorashooyin yar ama dugsiyo baahi weyn loo qabo looma xulan karo mid ka mid ah dugsiyada codsigooda.

### WAA MAXAY CHARTER SCHOOL?

Dugsiyada Charterka waa dugsiyo ay dowladdu maalgeliso, oo si gaar ah u shaqeeya. Iyada oo lagu salaynaayo sharciga gobolka ee hadda jira, dhammaan hawlwadeenada dugsiyada charterka ee Tennessee waa inay ahaadaan ururro aan faa'iido doon ahayn.

### CODSIGAN MA KU CODSAN KARAA DUGSI CHARTER AH?

Haa. Waxaad codsan kartaa waqti kasta sannadka oo dhan dugsiyada charterka ah ee doorta inay ka qeybqaataan nidaamka Codsiga Dugsiyada Ikhtiyaariga ah. Qaar ka mid ah dugsiyada charterka ah ayaa doorta inay isticmaalaan nidaamookda codsi. La xiriir dugsiga si aad u codsato dugsiga charterka ah ee aan ku jirin liiska.

### MAXAA DHACAYA HADDII CODSIGAYGU AANU DHAMMAYSTIRNAYN?

Cosiyada aan dhammaystirnayn lagama aqbali doono online-ka ama shakhsi ahaanba. Haddii aad boostada ku soo gudbiso codsi warqad ah oo aan dhamaystirnayn, lagama baaraandegi doono. Haddii codsigaaga la helo wixii ka dambeeya Feb. 9, 2024, waqtiga kama dambeysta ah, ilmahaaga laguma dari doono nidaamka xulashada bakhtiyaanasiibka ah ee fasalada K-10. Dhammaan codsiyada soo daaha (oo ay ku jiraan codsiyada dib loo soo gudbiyay) ayaa waxaa lagu dari doonaa dhammaadka liiska sugitaanka.

### WAALIDIINTA CODSIGAN MA KU CODSAN KARAA PREKINDERGARTEN?

Maya. Codsi gooni ah ayaa loo baahan yahay si loo codsado booska Pre-K ee dhammaan dugsiyada. Tan waxaa kale oo ku jira dhammaan boosaska Stanford Montessori and Hull-Jackson Montessori preschool (3-sano jirka) iyo Pre-K (4-sano jirka). Codsi gaar ah iyo habka xulashada bakhtiyaanasiibka ah ayaa loo qaban doonaa dhammaan boosaska Pre-K ee gu'ga 2024.

### MAXAA LOO BAAHAN YAHAY CODSIGA HADDII AAN AHAY FASALKA KOW IYO TOBNAAD AMA LABA IYO TOBNAAD EE DUGSIGA SARE?

Dhammaan codsayaasha fasallada 11aad iyo 12aad waa inay u keenaan nuqul dhammaystiran oo transcriptigooda dugsiga sare ah, kaarka warbixinta ee ugu dambeeyay iyo codsiga dugsiyada ikhtiyaariga ah maamulaha dugsiga sare oo ay rabaan inay u beddeshaan. Maamulayaashu waxay haysan doonaan ilaa saddex maalmood oo shaqo si ay dib ugu eegaan transcriptiga iyo codsiga ilmahaaga. Marka la dhameeyo dib u eegista, maamuluhu wuxuu codsiga dugsiyada ikhtiyaariga ah ku lifaaqi doonaa foomka dib u eegista oo sixiixan ka hor intaanad gudbin codsiga. Codsiyada waxaa la soo gudbin karaa laga bilaabo Janaayo 22, 2024. Dhammaan codsiyada la dhamaystiray ee la helay Maarso 8, 2024, waxaa la gelin doonaa nidaamka xulashada bakhtiyaanasiibka ah ee ardayda fasallad kow iyo tobnaad iyo laba iyo tobnaad

### MAXAY YIHIIN SHURUUDAHA GELITAANKA EE DUGSIYADA WAXBARSHADA MAGNETKA?

Ardaygu waa inuu buuxiyaa laba shuruudood si uu ugu qalmo gelitaanka dugsiga waxbarashada magnetka: darajooyinka waxbarshada ama buundooyinka imtixaanada caadiga ah. Fadlan eeg bogagga 9 iyo 10 si aad u hesho faahfaahin dhammaystiran oo ku saabsan shuruudaha 2024-2025.

### WAA MAXAY HABKA XULASHADA DUGSIYADA GAARKA AH?

Nashville School of the Arts (NSA) iyo Isaiah T. Creswell Middle School of the Arts waxaa ardayda looga baahan yahay bandhig. NSA and Isaiah T. Creswell Middle School of the Arts ayaa ogeysiin doona dhammaan codsadayaasha waqtiyada bandhigyada. NSA waxay 30 boos u hayn doontaa arday u qalinta ee ka soo gudbiya Isaiah T. Creswell Middle School of the Arts. Ardayda codsaneynsa dugsiyadan waa inay ku daraan liiska dugsiyada mudnaanta lagu siiyay codsigooda.

Nashville Big Picture High School wuxuu u baahan yahay inay ardayda wareystaan. Dugsigu wuxuu la xiriiri doonaa codsadyaasha si uu u diyaariyo waraysiyo. Early College High School wuxuu sidoo kale leeyahay shuruudo waxbarasho (eeg bogga 9).

MNPS Virtual School sidoo kale wuxuu leeyahay shuruudo waxbarasho wuxuuna codsadyaasha uga baahan yahay inay soo gudbiyaan muuqaal. Si aad u aragto shuruudaha gaarka ah, booqo websayka dugsiga.

### SIDEE U SHAQEYSAA XULASHADA WALAALAHA?

Xulashada walaalaha waxaa la siiyaa ardyda walaalaha ah ee dhigata dugsiga ay ka dalbanyaan, ilaa inta walaaku uu weli sii joogo dugsiga sannad dugsiyeedka 2024-2025.

Intaa waxaa dheer, marka laba walaalo ah ay isku dugsi codsadaan (laakiin heerar fasallo kala duwan) oo kaliya hal walaal la doorto, haddii waalidku aqbalo booska, walaalaha aan la xulan waxaa loo wareejin doonaa liiska sugitaanka ee mudnaanta walaalaha. Ardayga leh mudnaanta walaal waxaa laga siin doonaa boos ka mid ah liiska sugitaanka marka boos bannaan la helo.

Dugsiyada soo socda ma laha tixgelin walaal: East Nashville Magnet High School, East Nashville Middle School, Head Middle School, Hume-Fogg High School, Isaiah T. Creswell Middle School of the Arts, Martin Luther King Jr. School, Meigs Middle School, the Early College High School, MNPS Virtual School, Nashville School of the Arts and Rose Park Middle School. Dhammaan dugsiyada kale oo ay ku jiraan dugsiyada charterka, waxay leeyihiin texgelinta walaalaha.

### WAA MAXAY AAGGA MUDNAANTA LEH EE JUQRAAFIGA (GPZ)?

Aagga mudnaanta juqraafiyeed (GPZ) waxay mudnaanta oggolaanshaha siinaysaa qoysaska ku nool aagga juqraafiga ah ee ku wareegsan dugsiga ikhtiyaariga ah. Gelitaanka looma dammaanad qaadayo qoysaska deggan aagga GPZ. Si kastaba ha ahaatee, waxay helayaan meelaynta mudnaanta inta lagu jiro habka xulashada bakhtiyaanasiibka ah. Isticmaal aalada online-ka ah ee Zone Finder ***www.mnps.org*** ama wac 615-259-INFO(4636) si loo go'aamiyo haddii aad taal dugsi GPZ.

### WAA MAXAY MUDNAANTA CLUSTER-KA?

Qaar ka mid ah dugsiyada ikhtiyaariga ah ayaa waxay bixiyaan tixgelinta oggolaanshaha qoysaska ku nool juquraafi ahaan cluster-ka dugsiga sare. Intaa waxaa dheer, ardayda aagga ka baxsan ee dhigta dugsi ikhtiyaari ah oo raba inay ku sii socdaan dariiqa quudinta aagga waxay heli doonaan mudnaanta gelitaanka haddii uu dugsigu yahay. **Waalidiintu waa inay codsadaan ka hor waqtiga kama dambeysta ah ee codsiga si ay u helaan mudnaanta clusterka.**

### WAA MAXAY SHURUUDAHA GELITAANKA KINDERGARTEN?

Ardayda u qalanta Kindergartenka waa inay noqdaan 5 sano jor ka hor ama Ogo. 15, 2024. Haddii uu ilmahaagu u buuxsamayso 5 sano inta u dhaxeyso Ogo. 16, 2024, iyo Sebt. 30, 2024, waxaad la xiriiri kartaa MNPS si aad u weydiiso imtixaanka u diyaarsanaanta Kindergartenka adigoo wacaya 615-259-INFO(4636). Ardayda haysata buudooyinka Qiimaynta U Diyaargarowga Dugsiga Kindergartenka ah ee u qalma waxay soo gudbin karaan codsiga dugsiyada ikhtiyaariga ah. Ardayda aan buuxinta buundooyinka lagu galo waxay codsan karaan Pre-K.

### WAA MAXAY SHURUUDAHA U YAAL GLENDALE SPANISH IMMERSION?

» Arday kasta oo galaya kindergarten ama fasalka koowaad wuxuu codsan karaa Glendale.

» Codsadayaasha fasalad labaad iyo saddexaad waxaa looga baahan doonaa inay ku aflaxaan imtixaanka aqoonta luuqadda ka hor inta aan dugsiga laga aqbalin.

» Wax codsi ah looma aqbali doono fasallada afraad iyo shanaad.

### INTEE IN LE'EG AYUU ARDAYGU KU SII JIRI KARAA LIISKA SUGITAANKA?

Ardayda fasallada K-12 waxaa lagu haynayaa liiska sugitaanka ilaa maalinta shanaad ee dugsiga ee sannad dugsiyeedka 2024-2025. Wixii ka dambeeya malinta shanaad, liiska sugitaanka waa la baabi'inayaa marka laga reebo dugsiyada charterka ah. Liisaska sugitaanka dugsiga charterka waxay sii soconayaan sannad dugsiyeedka oo dhan.

### MA JIRAA GAADIIDKA DUGSIYADA IKHTIYAARIGA AH?

Inta badan, gadiidka baska dugsiga lama siiyo dugsiyada lagu bixiyo Codsiga Dugsiyada Ikhtiyaariga ah. Gaddiidka waxaa la siiyaa ardayda ku nool aagga mudnaanta juqraafiga (GPZ) ee Dugsiga Hoose Glendale Spanish Immerson. Intaa waxaa dheer, dhowr dugsi charter ah ayaa bixiya gaadiid. Si gaar ah ula xiriir dugsiyada si loo go'aamiyo gaadiid la heli karo.

Gaadiidka daweynaha ee mara WeGo Public Transit-ka ayaa kharash la'aan lagu siiyaa dhammaan ardayda dugsiga sare iyada oo loo marayo barnaamijka StrIDe, halkaas oo kaararka aqoonsiga ardayga loo adeegsado bas raacida. Isla barnaamijkaas ayaa diyaar u ah ardayda dugsiga dhexe ee dhigta dugsi ikhtiyaari ah marka laga reebo dugsiga dhexe ee chatrerka. Ogolaanshaha waalidka ee ardayda dugsiga dhexe ayaa loo baahan yahay si ay u helaan kaarka baska ee StrDe. Waalidiinta waxay la xiriiri karaan adeega macaamiisha WeGo iyagoo wacaya 615-862-5960 ama booqo ***www.wegotransit.com*** si ay u qorsheeyaan waddo ama u eegaan helitaanka WeGo.

## MA QABTAA SU'AALO DHEERAAD AH?

Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Qoyska 615-259-INFO(4636) ama booqo ***mnps.org***.

# Shuruudaha Gelitaanka Waxbarashada Magnetka ee 2024-2025

